



AGING AND LONG TERM SUPPORT ADMINISTRATION  
PO BOX 45600  
OLYMPIA WA 98504-5600

## Xuquuqahaaga

Your Rights

Waxaad mudnaan adigu u leedahay inaad xor ka ahaato ka-tagitaanka, tacaddiga, ka faa'iideysiga lacageed iyo daayaca. Haddii ay jirto sabab aad ku aamminsan tahay inaad adigu la kulantay ka-tagitaanka, tacaddiga, ka faa'iideysiga lacageed iyo daayaca, adiga ayaa xaq u leh in:

1. Aad siiso warbixin Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka (DSHS) iyo sharci fuliyeyaasha oo la wadaag macluumaad kasta oo aad aamminsan tahay inay aarinta la xiriiri karta baaritaanka, oo tilmaan qof kasta oo aad aamminsan tahay inuu hayo macaluumaad arrinta la xiriirta.
2. Aad xor ka noqoto argoosiga ku wajahan ka warbixinta ama u horseedka ka warbixin ka-tagitaan, tacaddi, ka faa'iideysi lacageed, ama daayac.
3. Laguula dhaqmo si sharaf leh oo lagugula hadlo luqada xurmayn leh.
4. Inaad hesho u waafajin macquul ah oo loogu talagalay naafanimadaada markaad ka warbixeeyso, iyo muddada la baarayo arrinta iyo qaabsocodyada maamuleed.
5. Inaad weydiisato amar ka mamnuuqa qof kasta oo adiga ka-tagay, ku tacaddiyay, ka faa'iideystay lacag ahaan ama ku daayacay inuu sii joogo gurigaaga, inuu adiga xiriir kula yeesho, ama inuu marin u yeesho lacagtaada ama milkiyaddaada.
6. Inaad ka hesho macluumaad DSHS iyo u-diritaanno habboon oo ah hay'adaha kale ee kuu doodi, baari, ama facil qaadi doona.
7. Inaad wax ka ogaato heerka baaritaanka, qaabsocoyada sharci, ficillada maxkamadeed, iyo natijjooyinka ay hesho hay'adda gacanta ku haysa kiis kasta oo aad adigu dhibbanaha tahay.
8. Inaad weydiisato u-diritaanno loogu talagalay u-dooditaanka ama gacan-qabasho sharchiyeed oo kaa caawisa qorsheynta amniga, baaritaannada iyo dhageysiyada.
9. Inaad ku cabato DSHS si rasmi ah ama aan ahaynba, ee ku saabsan baaritaannada ama qaabsocodyada sharci oo aad hesho jawaabo degdeg ah.

**Inaad warbixin ka samayso tacaddi, ka-tagitaan, daayac, is-daayac ama ka faa'iideysiga lacageed, ama aad weydiisato macluumaad, u wac:**

**1-866-EndHarm (1-866-363-4276)**  
**Voice/TTY Marin-h-Hel 1-800-737-7931**

Waxaa laguu wareejin doonaa Xafiiska Qaabilaadda APS ee maxalliga ah si aad u dhiibato warbixin ama aad u weydiisato macluumaad.

Macluumaadka La Xiriirkha Maxalliga ah: